# QAABKA CAADIGA EE DIB-U-MIDDEYNTA

## DIB-U- MIDEYNTA WAALIDKA IYO ARDAYGA

Waxaa laga yaabaa in ay dugsiga ay ka dhacdo marxalad waalidka ku kalifta in uu ilmihiisa uga soo qaato iskuulka qaab farsamo oo xeeladeesan. Qaabkani waxaa loogu yeeraa dib-u-mideyn waxaana suura gal ah in ay dhacdo xaaladan oo kale marka ay cimilada xuntahay, korontada tagto ama uu dab ama sun ka dilaacdo dugsiga. Qaabka caadiga ah ee dib-u-mideynta waa nidaam dejisan oo loogu talagalay in lagu dhaqmo marka ay timaado xaalad Qatar ah oo laga yaabo in ay dhacdo.

Maadaama qaabka dib-u-mideynta aysan mac-neheedo in uu iskuulka maalintaasi dhamaaday, dib-u-middeynta waxa ay ka dhici kartaa goob aan ahayn halka uu ardayga iskuulka ka dhigto. Goobtani hadii ay tahay goob kale oo iskuul ah, waxaa jira qaab ama nidaam xakameysan oo loo siidaanayo sidoo kale.

## WARGELIN

Waalidiinta waxaa loo wargelin karaa qaabab badan. Dugsiyada degmada waxay fariimaha kuugu soo gud-binayaan nidaamka baahinta fariimaha dhageysiga iyo qoraalka. Dugsiyada degmada waxay fariimaha kuugu soo gud-binayaan nidaamka baahinta fariimaha qoraalka iyo dhageysiga. Mararka qaar waxaa suuragal ah in ardayga laga codsado in uu fariin qoraal ah u diro waaliidiintiisa. Fariin qoraaleedka mideynta ee laga yaabo in ay kaaga timaado ardayga waxaa laga yaabaa in ay u ekaato sidan: Iskuulka waa laxiray, fadlan kaalay oo iga soo qaad 3:25 irida weyn ee laga soo galo iskuulka. Soo qaado kaarka aqoonsigaaga “

## WAXYAABAHA UU FILAN KARO WAALIDKA/ MAS’UULKA

IHadii waalid ama mas’uul lagu soo wargeliyo in loo baahanyahay in lasameeyo dib-u-mideyn, waxaa jira waxyaabo looga baahanyahay in waalidka ama mas’uulka uu ogaado. Marka hore, waa in aad la timaadaa wax laguugu aqoonsado. Taasi waxa ay noo fududeyneysaa kala soocida xiliga lagu gudo jiro dib-u-middeynta. Marka labaad, waa in aad dulqaad muujisaa. Dib-u-middeynta waa qaab bad-baado u ah ardayga waxa iyo waliba waxaa mas’uuliyadeeda qaadaya dugsiga si uu u mideeyo ardayga iyo waalidka ama cida ardayga mas’uulka ka ah.

## MAXAA DHACAYA HADII UU WAALID ILMOHOODA SOO QAADAN WAAYO?

Hadii ay waalidka u saamixi weydo in ilmohooda dib ula midoowaan, ilmahaasi waxaa loo ogolaanayaa in ay raacaan cida ugu qoran ugu diiwaangashan in lawaco marka ay dhacdo xaalad deg deg ah. Hadii ay waalidka u saamixi weydo in ilmohooda dib ula midoowaan, ilmahaasi waxaa loo ogolaanayaa in ay raacaan cida ugu qoran ugu diiwaangashan in lawaco marka ay dhacdo xaalad deg deg ah. Hadii kale, iskuulka waa uu haynayaa ilmahaasi ilaa waalidka uu ka soo qaato iskuulka.

## KAWARAN HADII ARDAYGA ISAGA DUGSIGA GAAR LAYIMID?

Waxaa dhici karta in mararka qaar in ardayga loo diido in uu baakinka kala baxo gaariga. Markaas oo kale waxaa waalidka lagu wargelinayaa in uu u imaado ardayga. Mararka qaarna ardayda dugsiga sare kaligood ayaa la siideyn karaa iyaga oo aan cidna wehelinin.


Macluumaadka Dib-U-Mideynta (PLEASE PRINT CLEARLY)
Sawirka aqoonsigaaga diyaarso si aad u tusto shaqaalaha dugsiga degmada

Magaca ardayga ....................
Fasalka ardayga .................... Telfanka gacanta ardayga ....................
Magaca qofka ka soo qaadaaya ardayga ....................
Saxiix ....................
Telefoonka waalidka ama masuulka ....................
Waxa uu u yahay qofka qaadaya ardayga ....................
Sawirka aqoonsiga qofka qaadaya ardayga waa ma’isleeyihiin? Haa ama Maya

**Waalid waa in uu buuxiyaa:**
Qor Magaca ardayga mar labaad ....................
Fasalka ardayga ....................
Taariikhda dhalashada ardayga ....................

**Waxaa dhamaystiraya shaqaalaha iskuulka marka ardayga la siideynayo**
Time | Initials | Other

## SIDA AY U SHAQAYSO

Ardayda waxaa laga codsanayaa in ay si nidaamsan oon buuqlahayn u sugaan. Ardayda waxaa suuragal in laga codsado in ay waalidiintood ama wixii mas’uul ka ah u diraan fariin qoraaleed. Ardayda looma ogolaan doono in ay fariimo qoraaleed kale ka diraam iskuulka gudihiisa ama banaanka ama goobta dib- u-mideynta. Waxaa haboon in aan iska yareyno isticmaalka intarnetka inta aan ku guda jiro dib-u-midenyta.

## KAARARKA DIB-U-MIDDEYNTA

Waalidiinta waxaa idiinla gud-boon laba tilaabo. Hadii uu waalidka iskuulka uu gaari u soo ka xeysanayo, waxaa lagula talinayaa in waa in uu ka foojignaadaa baaxada gawaarida taraafikada iyo waliba gawaarida deg deg san. Waalidiinta waa in ay gawaarida dhigtaan meelaha loo asteeyay ma’ahan in ay isaga tagaan. Waalidiinta waxaa laga codsanayaa in ay aadaan googta lagu mideynayo ilmahooda “ marka hore waa in aad iska soo xaadiriyaan goobta ayna layn soo galaan iyaga oo leenka kagalaya halka xarafka hore iyo kan dambe ee ilmahooda uu ka bilawdo. Inta ay leenka ky jiraan waalidiinta waxaa laga codsanayaa in ay buuxiyaan kaarka dib u mideynta. Kaarkani waxaa loo samaynayaa asyaan waana lakala jarayaa xiliga dib-u-mideynta. Macluumaadka labada dhinac kor iyo hoos uga qoran kaarka lakala bixinayo waa isku mid. Waalidiinta waxaa laga codsanayaa buuxiyaan dhamaan qaybaha kaarka.

Hadii ay dhacdo in aad ilmo badan leedahay oo aad doonaysid in aad dib-u-mideyso, arday waliba waxaa lagaaga baahanyahay in aad kaar u buuxisid.

## LA IMAW KAAR AQOONSI MARKA AAD SOO GALAYSID

Marka aad soo gashid, waxaa lagaa xaqiijninyaa in aad aqoonsiga iyo in aad mas’uul ka tahay ardayga.

Kaarka waa lakala bixinayaa qaybta hoose waxaa lasiinayaa waalidka.

Goobta laga soo galayo waaliidiinta waxaa la farayaa “goobta dib-u-mdeynta” Waxaa jiri doona qof idiinka qaadayo qaarka qaybta hoose kaasi oo u geyni doono ardayga ama ardayda goobta ay joogaan.

Waalidiinta waa in ay ogaadaan in mararka qaar lagu casumi karo gudaha dugsiga si loo weydiyo macluumaad dheeri ah.

## WAREYSIYADA IYO TALABIXINADA

Mararka qaar waalidiinta waxaa lagula talinayaa in ay qolada nabada sugida ay baaritaan samayn karaan waase marka loo arko in ay muhiim tahay. Marar qaar waxaa dhici karta in waalidiinta loogu yeero si deg deg ah hadii ay dhacdo xaalad.

SOMALI TRANSLATION COURTESY OF:
Lexington Public Schools
PO Box 890. Lexington. NE 68850 308-324-1207

© Copyright 2011-2014, All rights reserved. The “I Love U Guys” Foundation. Bailey, CO 80421. The Standard Reunification Method and I Love U Guys are Trademarks of The “I Love U Guys” Foundation and may registered in certain jurisdictions. This material may be duplicated for distribution by recognized schools, districts, departments and agencies.